



Waxay isku bedeshaa habka PPS ee wax looga qabto walaacyada iyo cabashooyinka

Sannad dugsiyeedkii hore waxaanu qiimeynaynay oo imtixaanaynay hababka ugu haboon ee waxtarka leh ee looga caawinayo qoysaska xalinta su'aalaha ama walwalka, heerarka dugsiya iyo degmada labadaba.

Waxaan sii wadi doonaa inaan marti galino oo aan taageerno kanaalada PPS ee qoysaska waxaana kuugu soo cusbooneysiin doonaa ikhtiyaarkan marka uu dugsiya bilaabmayo dayrta. Hadda, hoos waxaa ku qoran kheyraadka ay heli karaan dhammaan qoysaska PPS. Sida mar kasta, waxaan ku dhiirigelinnaa qoysaska in ay marka hore kala hadlaan cabashooyinka macalinka, xubnaha shaqaalaha ama maamulaha dugsigooda.

PPS waxay si buuxda uga go'an tahay inay dhegeysato oo ay aqoonsato meelaha laga welwelo iyo jidadka ku habboon xalinta. Waxaan sii wadi doonaa inaanu u adeegno khayraad ahaanaan, bixino macluumaadka ku saabsan siyaasadaha iyo nidaamyada degmada, iyo, marka ay haboontahay, aan qabano waxqabadyo aan rasmi ahayn iyo dhexdhexaadin.